



National Demographics Corporation



# Magaalada El Cajon Horudhaca Dib u Qeybinta Dagmada

Luulyo 14, 2021

Shannon Kelly, La-Talliye

Shirkadda Dadyowga Qaranka (National Demographics

Corporation)

# Habka Dib u Qeybinta Dagmada

Talaabada	Sharaxaadda
<b>Dhageysiga Hore Dadweynaha</b> Luulyo 14	La fulliyay ka hor inta aan la sii deynin emailada draaftiga Aqoonta hawsha iyo Bulshada la Daneeyo (Communities of Interest)
<b>Shaacinta Xogta Tirokoobka</b> Bartamaha/Dhamaadka Agoosto	Xafiiska Tirokoobka wuxuu shaacin doonaa xogta dadweynaha Tirokoobka rasmiga 2020
<b>Dhageysiga Dadweynaha #2</b> Sateembar 8	Sii wad Aqoonta hawsha iyo ku dar fikrado ku saabsan Bulshada la Daneeyo Bixi kor ka eegidda qalabka khariidada internetka si dadweynaha u isticmaalaan
<b>Shaacinta Xogta Kalifornia</b> Dhamaadka Sateembar/Horaanta Oktoobar	Kalifornia waxay shaacin doontaa xogta rasmiga dib u qeybinta dagmada “isku celcilinta maxaabiista” 2020
<b>Dhageysiga Dadweynaha #3</b> Nofeembar 4	Ka hadalka iyo firinta khariidada draaftiga Dadweynaha ka dalbo war celin ku saabsan khariidooyinka draaftiga
<b>Dhageysiga Dadweynaha #4</b> Janaayo 22	Khariidooyinka la baddalay ee la soo geliyay internetka lagana heli karo Magaalada El Cajon. Kala hadal iyo baddal fursadaha khariidada ugu dambeysuo ee lagu taliyay iyo ka hadalka isku xijinta doorashada
<b>Waqtiga ugu Dambeeyo</b> Isticmaalka Khariidada Abriil 17, 2020	(Doorashada Laga Gooyay 205 Maalin) Taariikhda ugu Dambeysuo oo lagu dhaqmo ammarka khariidada

# Maxay Tahay Sababta aan u Samayneyno Tani Mar Kale iyo Dhakhso?

10 sanno kasta, dawladda federaalka waxay fullisaa tirokoob kaddibna Magaalo kasta waa in ay casriyeyso dagmooyinkeeda doorashada si ay u muujiso tirinta ugu dambeysay dadka

Magaalada El Cajon, oo adeegsaneysa Measure S, waxay u coddeysay in ay ka guurto cod bixinta balaaran una guurto siistemka doorashada dagmada sannadkii 2016. Khariidooyinka dagmada waxaa la sameyay 2017 iyadoo la isticmaalo tirinta dadka 2010. 2018 waxay ahayd doorashada kowaad ay dagmada dooratay xubnaha Guddiga Magaalada

**Dhab ahaan, wax miyaa iska baddalay sida ay u samaysan yahiin dagmooyinka taasoo dhallisay in loo baahdo khariidad cusub?**

Waxaa dhici karto in tirada la casriyeyay ee dadyowga in ay muujiyaan in dagmooyinka iminka jira aysan soo gelin miisaanka iyo in loo baahan yahay in Sharciga Khariidooyinka Xaqa California (California Fair Maps Act) abuuray hab cusub oo loo baahan yahay in la tixgeliyo.



# Sharciyada iyo Ujeedooyinka Dib u Qeybinta Dagmada

## 1. Sharciyada Federaalka

Dad Isla'eg

Sharciga Xuquuqda Cod Bixinta Federaalka (Federal Voting Rights Act)

Lama Ogola in Dadka Lagu Qeybiyo Isirka (No Racial Gerrymandering)



## 2. Habka California ee Magalooyinka

1. Joqraafi ahaan isku dhaggan
2. Xaafadaha aan la qeybinin iyo "bulshada la daneeyo"  
("communities of interest")  
(Xaafadaha joqraafiyada bulshodhaqaale ee loo baahan yahay in leysku haayo)
3. Xuduudaha sida fudud loo aqoonsan karo
4. Heshiiska  
(Ha dhinac marrin koox si aad u gaartid koox kale oo kaa fog)

### La Mamnuucay:

"Ma soo dhawaysan dooni ama ma takoori dooni xisbi siyaasi."

## 3. Hiddaha Mabaadii Dib u Qeybinta Dagmada

Yareey cod bixiyeyaasha loo gudbiyay sanoojin doorasho ka duwan

Xushmee xulashooyinka cod bixiyeyaasha / sii socoshada xafiiska

Koriimada dadka mustaqbalka

Keydinta muhiimadda ay leeyahiin dagmooyinka jira

# Sifeeynta Xaafadaha

---

**Su'aasha 1<sup>aad</sup>: Maxay tahay xaafadaada?**

**Su'aasha 2<sup>aad</sup>: Maxay yahiin xuduudeeda joqraafiyadda?**

**Tusaalooyinka astaamaha sifeeyya xuduudda xaafadda:**

- Xariiqmanka qeybiya xaafadda dabiiciga, sida wadooyinka (highways) ama jidadka waaweyn, wubiyada, kanaalada iyo/ama buuraha
- Agagaarka beeraha ama dugsiyada
- Astaamaha xaafadda kale

**Bacdamaa aan la haynin fikradaha dadweynaha, diiwaanka qorsheynta iyo warqadaha kale ee la midka ah waxaa laga heli karaa sifeyn.**



# Xaafadaha Kaddib: Sifeynta Bulshada la Daneeyo


## Su'aasha 1<sup>aad</sup>: Maxaa sifeya bulshadaada?

- Joqraafiyadda Xaafadda (Geographic Area), lagu darray
- Arrinta la qeybsado ama sifada
  - Maslaxad bulsho ama dhaqaale oo la qeybsaday
  - Waxaa saamayay siyaasadaha dagmada
- Noo sheeg "sheekada bulshadaada"

## Su'aasha 2<sup>aad</sup>: Ma dhici kartaa in bulshadaan ka fa'iideysato "in lagu darro hal dagmo keliya xagga ujeedooyinkeeda waxqabadka iyo mattalaadda xaqa"?

- Ama mivav fa'iido badan tahav leedahav in la veesho wakiilo badan?  
Sifeynta Bulshada la Daneeyo kama mid aha xariirka lala leeyahay xisbiyada siyaasadda, sarakiisha haaya xafiiska, ama musharaxiinta siyaasadda.

# Xaafadaha Suurtogalka / Bulshada



# Ka Dheer Xaafadaha: Bulshada

---

Sida hoos timaado Xeerka Doorashooyinka California (California Elections Code), "bulshada la daneeyo" ("community of interest") waxaa loola jeedaa sifeyn cayiman marka la fiiriyo xaaladda qeybinta dagmada iyo dib u qeybinta magalooyinka iyo dagmooyinka:

"Bulshada la daneeyo" waa dad qeybsada danno bulsho ka dhexeyso ama danno dhaqaale oo loo baahan yahay in lagu darro hal dagmo keliya si wax looga qabto loona mattalo.

Bulshada la daneeyo kama mid ah xariirka lala leeyahay xisbiyada siyaasadda, sarakiisha xafiiska haaya, ama musharaxiinta siyaasadda.

(waa la xoojiiyay)

# Dhageysiga Dadweynaha iyo Wada Hadalka

---

Maxay tahay xaafadaada iyo maxay yahiin xuduudooda?

Maxay yahiin meelaha kale ee ka muuqan karo Magaalada, iyo maxay yahiin xuduudooda?

Maxay yahiin Bulshada la Daneeyo, kuwa muhiimka ah, ee El Cajon?

- Joqraafiyada Xaafadda (Geographic Area), lagu darray
- Arrinta la qeybsado ama sifada
  - Maslaxadda bulshada ama dhaqaalaha la qeybsaday
  - Saamaynta siyaasadda dagmada
- Sifooyinka kale ay ku mideysan yahiin

# Talaabadaha Xiga

---

La Xariir Bogga Dib u Qeybinta Magaalada El Cajon (City of El Cajon Redistricting Page) si aad u heshid macluumaad badan:

[www.elcajon.gov/redistricting](http://www.elcajon.gov/redistricting)

Faalo ka bixi:

[redistricting@elcajon.gov](mailto:redistricting@elcajon.gov)

## DHAGEYSIGA DADWEYNAHA LABAAD (Sateembar 8)

Wada Haddalada Dheeraadka iyo Talaabadaha ku saasban Bulshada la Daneeyo (Communities of Interest)

Horudhaca Qalabka Khariidada Dadweynaha